

## LIFAAQ

### TALO SOO JEEDINTA GUDIYADA FARSAMADDA

#### Talo soo Jeedinta Seminaarka Habka wax fulinta

. In la kaalmeeyo Soomaaliya si ay u dhisato booliis tayo leh iyo ilaaladda xeebaha, lana siiyo awoodii ay ku fulin laheyd sharciga si ay wax uga qabato burcadbadeednimada, daadgureeynta sharci darada ah ee dadka, kaluumeysiga sharci darada ah iyo ku-qubista haraadiga sunta ee wadanka

- In la taageero dadaalka Qarammadda Midoobay ee ku aadan fududeynta qoritaanka heshiisyada ku haboon- Ship Riders' Agreement- taas oo dhaxmarayso ciidamada hadda maraakiibta saran ee waardiyeynayo badweynta, ayaga oo taageerayo Qaraaradda Golaha Amaanka, isla markaasna iskaashi lkula sameeynayo wadamadda Gobalka, Taageeridani waxaa ka mida ah tababar siinta ciidamadda maraakiibta saaran.
- In lagu dhiiri geliyo Shirka Heerka Gobal ee Jabuuti loogana hadlaayo burcadbadeednimada in uu qiimeeyo isku-dayga Heerka Gobal ee hadda Jira, lana xoojiyo taageeradooda- meesha ay ku haboon tahay.
- In la taageero isku'dayada hadda jira laguna dhisaayo xaruumo war is dhaafsi ee heer Gobal, xaruumahaas oo laga dhiso Kenya iyo Yemen si loo dedejiyo is-dhaafsigu xogta ku saabsan dhismaha xarumaha aan soo sheegnay.

#### Talo soo Jeedinta Seminarka Arrimaha Ganacsiga

- In la dhiiri geliyo daraasada ku saabsan siyaasad loo dhan yahay ee ka hortegeysa bixinta madax-furashada, isla markaasna noqoneysa mid wax-tar iyo dhqangelin-ba leh.
- In laga dhigo xeebaha Soomaaliyeed goobo nabadgelyo leh, ogolaanayana in ay dib u soo kabtaan bulshada kaluumeysatada ah ee Soomaaliyeed
- In la fududeyo, lana hirgelyo habkii qurbajoogta Soomaaliyeed ay u maalgelin lahaayeen xeebaha Soomaaliyeed si wax ku ool ah.

#### Talo soo jeedinta seminarka tayeenta wax-qabadka

- In la dhiso guddi ka kkoban Qarammadda Midoobay, Bulshada Caalamka iyo Wakiilo Soomaaliyeed si ay u soo sheegaan una baaraan cabashooyinka ka jira deegaanka, kuwaas oo la xariira arrimaha dhaqaalah, nabadgelyada iyo ka faaiideysiga sharci darada ah ee kheyraadka badaha Soomaaliyeed, taas oo ay ka mid yihiin daabuleynta sharci darada ah ee dadka iyo hubka, ku-qubista haraadiga sunta ah iyo ka-luumeysiga sharci darada ah-ba.
- Guddiga aan soo sheegnay wuxuu ka koob-naan doonaa wadama ay khuseeyaan Arrimaha Gobalka sida Midowga Afrika, IGAD, Soomaaliya, Egypt, Kenya, Oman, Saudi Arabia, UAE, iyo Yemen, kuwaas oo la

imaanaaya habkii loola dagaalami lahaa isku-xirnaashaha dhaqaale ee burcadda.

- In la xorumariyo talabooyinka lagu sugaayo nabadgelyo waqtigaan, lagana faa'iideysto fursadaha uu abburay Geedi Socdka Jabuuti, taas oo ay ka mid noqon karto dhismaha iyo tababarista ciidan ilaaliya xeebaha ,arrintan waxaa looga denbeynayo Guddiga Wadajirta eeArrimaha Nabadgelyada.
- Taageerida talaabooyinka kale ee lagu sugaayo arrimaha nabadgelyada sida cusbooneysiinta mandaatadda Ciidamadda AMISOM, siinta mushaaraadka Ciidamada sida haboon u tababaran, iyo booliiska Soomaaliyeed ee diiwaan gashan.
- Horumarinta habkii lagu sugi lahaa arrimaha nabadgelyada, waxna looga qaban lahaa nabadgelyada bani'aadanka ayada oo loo maraayo dhisida kaabayaasha dhaqaalaha
- Waa in ay Qarammadda Midoobay la timaado talaaboyin wax ku ool ah, laguna horumarinaayo arrimaha soo socda: Habka Maamulidda biyo-mareenada, taageerida ilaalada xeebaha, adeegsiga sharuucda dhaqdhaqaaqa maraakiibta iyo xaaladda ka kantaroolka ama la socoshada dekedaha.